**MAGAALADA HELSINKI**
Barbaarinta iyo waxbarashada
Waxbarashada aasaasiga ah

# KA QAYBQAADASHADA WAXBARASHADA DIINTAADA

Foomka waxaa buuxinaya xubnaha **mujtamacyada diimaha kale** ee aan ahayn kansiisadda Injiilka Luteran ama kaniisadda ortodoksiga iyo weliba **kuwa aan ka tirsanayn mujtamac diimeed, kuwaas oo barbaarintooda ama asalka dhaqankooda dartiis uga qaybqaadanaya barashada diinta.**

Macluumaadka waxaa loo wareejinayaa barta maadadda aragtida ee qaybta Macluumaadka rajistareeshinka ardayga ee Primus.

Foomka waxaa lagu keydinayaa fasalka.

| Magaca qoyska iyo kan koowaad ee ardayga | |
|---|---|
| Diinta cunugga<br>☐ Katoolig ☐ Islaam ☐ Buddiiste ☐ Krishna | Mid kale, Maxay tahay? |
| Mujtamaca diimeed ee uu ardaygu ka tirsan yahay | |

☐ **Waxaa ardayga u codsanayaa barashada diintiisa**

Haddii aanay waxbarashadu hirgelayn, ardaygu wuxuu ka qaybqaadanayaa (ka dooro kuwan soo socda hal)

☐ Waxbarashada diinta loo badanyahay

☐ Waxbarashada u dhiganta ee uu dugsigu qabanqaabiyo

☐ Waxbarashada u dhiganta oo ay jimciyaddu qabanqaabiso, taas oo aanu ardaygu ka heleyn dhibco shahaadada lagu qoro *)

☐ Waxbarashada cilmiga aragtida macnaha nolosha

☐ **Uma codsanayo ardayga barashada diintiisa**

Markaas wuxuu ardaygu ka qaybqaadanayaa (ka dooro kuwan soo socda hal)

☐ Waxbarashada diinta loo badanyahay

☐ Waxbarashada u dhiganta ee uu dugsigu qabanqaabiyo

☐ Waxbarashada u dhiganta oo ay jimciyaddu qabanqaabiso, taas oo aanu ardaygu ka heleyn dhibco shahaadada lagu qoro *)

☐ Waxbarashada cilmiga aragtida macnaha nolosha

| | |
|---|---|
| Goobta iyo taariikhda | Saxiixa iyo magaca waalidka oo buuxa |

*) Waa in dugsiga la keenaa shahaadada waxbarashada u dhiganta ee ay jimciyaddu bixiso.

OGEYSIIS AYAA KU QORAN BOGGA XIGA

**Ka qaybqaadashada waxbarashada maaddooyinka aragtida**

**Ka qaybqaadashada waxbarashada maaddooyinka aragtida** Waxbarashada diinta loo badan yahay ee la qabanqaabiyo waxaa codsiga waalidka **markasta** uga qaybqaadan kara ardayda ka tirsan jimciyadaha diimeed ee kale **ama** kuwa aan kuwaas xittaa ka tirsanayn. Waxbarashada diinta loo badanyahay ee magaalada Helsinki laga qabanqaabiyo waa Injiilka Luteran.

- Dadka ka tirsan jimciyadda Injiilka Luteran waxay ka qaybqaadanayaan markasta barashada Injiilka Luteran.
- Dadka ka tirsan jimciyadda Ortodoksigu waxay baranayaan waxbarashada Ortodoskiga *ama* waxbarashada loo badan yahay.
- Dadka aan ka tirsaneyn jimciyadaha diimuhu waxay baranayaan cilmiga aragtida macnaha nolosha.
- Waxbarashada waafaqsan tan loo badanyahay, yacni waxbarashada Injiilka Luteran waxaa haddii uu waalidkood u codsado ka qayqaadan kara ardayda oo dhan.

Ardayda ka tirsan jimciyado diimeedyada kale ee Finland ka diiwaangashan oo aan ahayn kaniisadda Injiilka Luteran ama kaniisadda Ortodoksiga, islamarkaasna aan ka qaybqaadan barashada diinta loo badan yahay (Injiilka Luteran), waxaa loo qabanqaabinayaa haddii uu waalidkood u codsado **barashada diintooda.** Waa in ardaydu ay xubno ka ahaadaan jimciyad diimeedkaas laga hadlayo ama waa in diinta la barayo ay noqotaa mid u dhiganta aragtidiisa diimeed ee ku salaysan barbaarinta la siiyo iyo asalka dhaqankiisa (dastuurka 13 § faqraddiisa 6). Haddii loo baahdo wuxuu dugsigu waalidka ka codsan karaa in uu keeno caddayn la aamini karo oo ku saabsan xubinnimada jimciyadda diinta ama xiriir ka dhexeeya barbaarinta cungga la siiyo iyo asalka dhaqankiisa iyo diinta la barayo. Waxbarashada diinta ee aan weli lagu bixin dugsiyada magaalada Helsinki, waxaa haddii ay waalidku u codsado loo billaabayaa ugu yaraan saddexarday oo reer Helsinki ah, kuwaas oo ka tirsan jimciyad diimeed diiwaangashan.

- Helsinki waxaa si joogto ah looga qabanqaabiyaa barashada diinta katooligga, islaamka, buddiistaha iyo Krishna. Inta badan goobta waxbarashadu waa dugsiga ardayga, inkastoo waxbarashada loogu hirgeliyo kooxaha sidii waxbarasho deegaan. Waxbarashada waxaa loo bixinayaa si waafaqsan qorshaha waxbarashada. Qorshayaasha waxbarashada ee barashada diinta fasal-sannadeedyada 1-9 waxaa laga helaa: ops.edu.hel.fi
- Barashada diinta waxaa iyadoo waalidku codsanayo looga qaybqaataa **foomka Ka qaybqaadashada waxbarashada diinta.**
- Haddii aanu ardaygu ka qaybqaadan barashada diintiisa ama cilmiga aragtida macnaha nolosha, diinta ardayga ama cilmiga aragtida macnaha noloshana aan lagu dhigin dugsiyada waxbarashada bixiya, waxaa ardayga loo qabanqaabinayaa waxbarasho kale ama waxqabad la hagayo.
- Ardaygu wuxuu waxbarashada kale ama waxqabadka la hago ee uu dugsigu qabanqaabiyo beddelkeeda ka qaybqaadan karaa waxbarashada ay jimcid diimeedkiisu bixiso. Waalidku waa in yy dugsiga u keenaa caddayn ku saabsan xubinnimada ardayga ee jimciyad diimeedka iyo ka qaybqaadashadiisa waxbarashada dugsiga ka baxsan. Dhibcaha laga yaabo in laga helay waxbarashada ay jimciyad diimeed bixiso **laguma** qorayo shahaadada.

Doorashooyinka iyo go'aannada quseeya waxbarashada aragtida waa kuwa sida waxbarashooyinka kale u joogto ah ah, doorashadana lama beddeli karo. Haddii jimciyad diimeedka ardaygu ay isbeddesho ama ardaygu aanu kuba jirin wax jimciyad diimeed ah waalidka ardaygu wuxuu si kastaba ha ahaatee xaq u leeyahay beddelista doorashada. Isbeddellada suuraggalka ah waxaa la sameeyaa sannad-dugsiyeedkiiba mar.